

Uumi, Huur iyo Caaryo



Si aad u hesho macluumaadkan oo qaab muuqaal ah, sawir koodka QR ama booqo

www.youtube.com/watch?v=TEKK00heaZc



Waxaa jira saddex hab oo gurigaagu ku noqon karo huur. Halkan ayeeynu ku eegi doonaa mid kasta oo ka mid ah waxaanu soo jeedin doonaa siyaabo looga hortago.

1) Uumi

Uumigu waa sababta ugu badan ee huurka. Marka hawada qoyan ay gaarto meel qabow sida darbiyada, saqafka, daaqadaha ama tuubooyinka, waxay isu beddeshaa biyo taas oo meelaha ka dhigta kuwo qoyan. Meelaha qoyan waa kuwo ku habboon koritaanka caaryada.

Waxaan soo saarnaa qoyaana badan, hawl maalmeedkeenna sida qubeys, karin, qallajinta dharka iyo neefsashada.

Uumi waxaa keena sababahan:

- Hawo-qaadis aan ku filnayn.
- Qoyaana badan oo ka yimaada dad badan, karin iyo dhar gudaha lagu qalajiyo.
- Dahaadh ama darbi aan dhammeystirneyn oo sababa meelaha qabow.
- Kuleyl yari oo sababa meelaha in ay qaboojiyaan.


Caaryada ka dhalata uumiga waxaa lagu gartaa dhibco madow oo ka muuqda darbiyada ama daaqadaha.

Laba xal oo degdeg ah:

- Soo saar qoyaana yar sida inaad dabool ku saarto digsi kasta oo karin ah ama dharka dibadda ku qalajiso.
- Hubi in hawada qoyan ka baxdo guriga adigoo furaya daaqadaha, isticmaalaya marawaxadaha jikada iyo musqusha.

Raac talooyinka liiska ku xiga.

Qoys caadi ah wuxuu soo saaraa qiyaastii 10 litir oo qoyaana ah maalintii oo keliya.



Nicol, F. and Rudge, J. eds., 2005. Cutting the cost of cold: Affordable warmth for healthier homes. Routledge.



2) Huurka gudba (huur daadgal)

Tani waa huur ka yimaada bannaanka guriga oo soo gala darbiyada, saqafka, sagxadda, albaabada ama daaqadaha. Waxay inta badan ka sii dartaa marka roob iyo dabayl jiraan.

Sababaha ugu badan:

- Saqaf dhaawacmay.
- Dildilaacyo ku yaalla shubka gidaarka.
- Biyo-mareen jaban ama daadanaya.
- Biyo shubka saqafka oo cilad leh.
- Alwaax qudhmay ama farqiyo ka jira daaqadaha iyo albaabada.
- Dhulka bannaanka oo aad u sarreeya oo biyaha ku riixaya gidaarka.

Biyaha waxay u safri karaan toos ama dhinac, sidaa darteed huurka meesha ka muuqda mar walba ma muujinayo meesha ay biyuhu ka soo galayaan. Haddii aadan heli karin sababta, la tasho khabiir huur.

Xalka waxaa ka mid ah:

- Xir dildilaacyada darbiyada.
- Beddel ama hagaaji tiles-ka saqafka, felt-ka iyo flashing-ka.
- Nadiifi oo hagaaji biyo-mareennada.
- Hoos u dhig heerka dhulka bannaanka haddii uu aad u sarreeyo.

Mararka qaar waa shaqo guriga lagu sameeyo, mararka qaarna waxaad u baahan kartaa qof xirfadle ah.

NB. Regular building maintenance is recommended to reduce the risk of penetrating damp occurring.

3) Huurka kor u kaca (huur kacsan)

Sababta ugu badan waa damp-proof course oo jaban ama aan la dhigin markii hore. Tani waa xayndaab caag ama bitumen ah oo lagu geliyo darbiyada si uusan qoyaan kor ugu kicin.

Guryo qaarkood lama darin damp-proof course markii la dhisay, qaarna waxaa lagu dhaawacay shaqo dhisme oo dambe. Sidoo kale dhulka bannaanka ayaa mararka qaar laga yaabaa inuu ka sarreeyo lakabkaas.

Badanaa huurka waxaa loo malaynayaa inuu yahay huur kor u kaca laakiin waxaa ka dhasha kondheyshan ama huurka daadgalka. Had iyo jeer khabiir u yeer.

Guryaha duugga ah waxay ku dhisnaayeen walxo neefsan kara oo qoyaan u oggolaanaya inuu ka baxo. Markaad ku darto walxo aan neefsan karin sida cement darbi, huur ayaa ku ururi kara.

Xalka:

- Rakibid damp-proof course cusub.
- Qoditaan kanaal biyo daadis ah guriga hareerihisa.
- Ka saarista plaster ama render aan neefsan karin oo lagu beddelayo mid lime ah oo hawo mariya.

Mar walba la tasho khabiir.

Caaryo

Guri qoyan waa meel ku fiican koritaanka caaryada. Caaryadu waxay ku kortaa meelaha qoyan. Haddii aan la daawaysan, way sii faaftaa. Caaryadu waxay ku dhex faafi kartaa darbiga ilaa hal mitir meel ka baxsan qaybta muuqata.





Liiska hubinta ee dhimista Uumiga

Huurka inta badan wuxuu ka yimaadaa kondheyshan. Liiskan talooyinka ah ayaa kaa caawinaya sidii aad u yareyn lahayd.

KULEYLKA

- Hubi in nidaamka kuleylka si fiican u shaqaynayo. Waxa laga yaabaa inuu u baahdo adeeg ama in radiators la dayactiro
- Xilliyada qabow, shid kuleylka si joogto ah, ma aha in uu maalin walba shaqeeyo laakiin ku filan in guriga uu qalajiyo. **Haddii aadan awoodin, samee waxyaabaha kale ee hoose ku qoran...**

HAWO QAADIS

- Fur daaqadaha guriga si aad hawada u wareejiso.
- Xiro albaabada jikada iyo musqusha marka aad karinayso ama qubeysanayso si qoyaanku uusan u fidsan.
- Hubi in fans-ka jikada iyo musqusha ay nadiif yihiin oo shaqeynayaan.
- Ha xirin maraxawadaha daaqadaha.
- Hubi in vents-ka iyo airbricks-ka(marinka maraxawadaha) aysan xannibnayn.
- If you notice mould behind sofas or other furniture, move them away from the walls to allow air to circulate around the back.
- Dad badan ama xayawaan badan oo qol yar ku jira waxay kordhiyaan qoyaanka; kordhi hawo qaadista.
- Isticmaal qalab cabbira huurka (hygrometer) si aad u ogaato qolka u baahan hawo qaadis joogto ah.

YARAAYNATA HAWADA QOYAN

- Marka aad karinayso wax , dabool saar digsi kasta si aad u qabato uumiga.
- Iska ilaali inaad dharka gudaha ku qalajiso haddii ay suurtagal tahay.
- Haddii aan dibadda lagu qalajin karin, isticmaal spin laba jeer oo mashiinka ah ama ku qalaji qolka adigoo daaqad u furaya.
- Hubi in dharka si buuxda u qalalay ka hor inta aan la gelin armaajo.
- Ha isticmaalin heaters gaas ah gudaha guriga.
- Isticmaal dehumidifier haddii ay jirto xaalad daran.

DAAWAYNTA CAARYADA

- Nadiifi caaryada muuqata adigoo isticmaalaya buufin 'bleach'wata, ha qalalo, kadib mar kale ku celi.
- Haddii caaryadu ka dambeyso fadhiyada ama alaabta guriga, ka qaad darbiga si hawada u wareegto.
- Si aad u disho caaryada aan muuqan, daawee meel hal mitir ka weyn qaybta caaryada.
- Ku celi daawaynta mar kasta oo caaryadu soo noqoto.
- Ka tuur alaabta ama alaabta guriga ee si xun u saamaysay oo aan la badbaadin karin.



Mittiradda qiyaasa qoyaanka hawada guriga

Hygrometers waxay cabbiraan inta qoyaanka ee hawada ku jirta. Qoyaanka wanaagsan waa 40% ilaa 60%. Marka uu ka bato 60% waxaa jirta khatar caaryo. Waa la iibsaa karaa qiime jaban.

Saarayaasha uumiga iyo qoyaanka 'Dehumidifiers'

Dehumidifiers reduce the amount of moisture in the air. They can help resolve condensation issues in your home, especially if you can't follow all of the actions on the checklist.

- Dehumidifier-ka u dejiso inuu ka hooseeyo 60% qoyaanka.
- Maalmaha diiran daaqaad furid waxay la mid tahay dehumidifier.
- Marka uu shaqaynayo, xir daaqaadaha iyo albaabada qolka si uu si fiican u shaqeeyo.
- Dooro mid awood u leh inuu ka saaro ugu yaraan 5 litir biyo maalintii.
- Waxaa fiican inay ku kacaan ku dhawaad 100 pound.
- Qiimaha shaqadiisu waa qiyaastii 17p saacaddii.



Liiska hubinta ee mulkiilayaasha iyo guryaha la kireeyo

- Kuleyli guriga oo si fiican u dahaadh.
- Hubi in ay jiraan fans-ka jikada iyo musqusha oo si joogto ah u shaqeeya.
- Rakib marxawaddo hawada saara haddii daaqaadaha aysan lahayn.
- Hubi in albaabada jikada iyo musqusha la xiro marka qoyaanku jiro, iyo in albaabada kale ay hoose ka furan yihiin ilaa 1 cm si hawadu u wareegto.
- Hubi in nidaamka kuleylka si joogto ah loo dayactiro.
- Bixi meel bannaan oo dharka dibadda lagu qalajiyo.



St James Court
St James Parade
Bristol BS1 3LH

0117 934 1400
cse.org.uk
info@cse.org.uk

Contact us:

PHONE 0800 082 2234

EMAIL home.energy@cse.org.uk

We're a charity (298740) supporting people and organisations across the UK to tackle the climate emergency and end the suffering caused by cold homes.

Our Home Energy Team offers free advice on domestic energy use to people in central southern and southwest England.

See all our energy advice pages at www.cse.org.uk/advice